TILMAANTA BUKAANKA SAWIRKA BAARISTA KLIINIKADA MANKATO

# ULTRASOUNDKA KILLYAHA

Renal Ultrasound - Somali

Bukaanka: ______________________________________________________________

Taariikhda Ballanka: _______________ Waqtiga Imaashada: ___________________ am/pm

Goobta: Waaxda Sawirka Baarista ee Kliinikada Mankato
1230 East Main Street, Mankato, MN 56001

**Maxuu yahay Ultrasoundka Killyaha?**

Ultrasoundka killiyaha wuxuu adeegsadaa hiirarka dhawaaqa, ma adeegsado shucaaca, iyo qalab lagu magacaabo "transducer si loo helo sawirada killiyahaada iyo kaadi haynta ee ku jira gudaha dhexda.

## Baarista Ka Hor

- Ma jirto cunto kaa reeban xagga baaristaan.
- In aad soo daahdid waxay dhalin doontaa in ballan kale loo qabto baaristaada.

## Inta ay Socoto Baarista:

- Waxaa lagu weydiin doonaa in aad dharka iska dhigtid. Waxaa lagu siin doonaa goono.
- Waxaa lagaa codsan doonaa in aad ku seexatid sariir.
- Baaristaan waxay qaadan kartaa ilaa 30 daqiiqo si loo dhamaystiro.
- Burcad diiran ayaa lagaa saari doonaa qeybta caloosha iyo/ama qeybta simanka.
- Qalabka "transducer" ayaa la marmari doonaa calooshaada iyo/ama qeybta simankaada inta ay socoto baarista.
- Qalabka wuxuu qaadi doonaa dhowr sawir, waxaaa lagu weydiin doonaa in aad ceshatid neefta marka qaadaayo sawirada qaar.
- Sawiradaada waxaa fiirin doono, waxaan akhrin doono aqoonyaanka qalabka shucaaca.
- Warbixinta saxixan ee ugu dambeyso waxaa loo diri doonaa bixiyaha dalbay baarista.

## Baarista Kaddib:

- Waxaad ku noqon kartaa cuntadaada caadiga haddii aan lagu siinin tilmaamo kale.

**Waa la fiirin doonaa baaristaada, waxaana akhrin doono aqoonyaanka Raajada 24ta saac xigta gudaheeda. Waxaa warbixin loo diri doonaa bixiyehaada si uu u fiiriyo. Bixiyehaada wuxuu mas'uul ka yahay in uu kuu soo gudbiyo natiijadaha, waxaana laguu soo diri doonaa warqad, telefoon, ama waxaa lagu siin doonaa ballan si laguula socdo. Haddii aan lagu siinin ballanka laguula socdo, aadna waxba ka maqlin muddo hal todobaad gudaheeda, waxaad xaq u leedahay in aad wacdid waaxda bixiyehaada una weydiisid natiijada.**

**Haddii aadan awoodin in aad xajisid ballankaada ama aad su'aalo ka qabtid baaristaada, fadlan wac 507-389-8570.**

**Fadlan iska xaadiri Diiwaan Gelinta Dhexe (Central Registration) ka hor inta aadan tagin Waaxda Sawirka Baarista.**